

Qoysaska Qaaliga ah ee Degmadda 622,

Waxaan soo gabagabeyneynaa toddobaadka labaad ee barashada masaafada ah, Waxaan doonayay inaan muujinno mahadnaq weyn waqtigaan. Waad ku mahadsan tihiiin ardaydeena, qoysaska, iyo shaqaalaheenna dhammaan dabacsanaanta iyo iskaashiga labadan toddobaad ee la soo dhaafay. Fadlan xusuusnow, berri, jimcaha, Abriil 10 iskuul ma jiro.

Waxaan rabaa inaan u mahadcelinno shaqaalaheena ka shaqeeya safka hore isla markaana shacabka la shaqeeya. Toddobaadkan oo keli ah, adeegyadayada nafaqeynta iyo shaqaalaha gaadiidku waxay u diyaariyeen oo gaarsiiyeen ku dhawaad 36,000 oo cunno ardaydeenna! Shaqaalaheena Xiriirinta Iskuxiranka waxay sii wadaan inay siiyaan xanaano caruureed xanaanada caafimaadka, xaalada degdega, iyo shaqaalaha daruuriga ah sida uu ubaahanyahay gudoomiye Walz. Dhanka kale, macalimiinteenu waxay sii wadaan wada shaqeynta sidii wax looga badali lahaa loona horumarin lahaa barnaamijkeena barashada masaafada markaan sii socono. [Fadlan booqo xiriirkan si aad u aragto fiidiyow muujinaya qaar](#) ka mid ah mahadcelintii ay shaqaalaheenu ka heleen waalidiinta iyo dadweynaha xagga warbaahinta bulshada iyo emaylka. Waxaan u mahadcelineynaa fikradahaaga wanaagsan!

Maaddaama aan galayno usbuuca saddexaad ee barashada masaafada, waxaan rabnaa inaan u mahadcelino dhammaan qoysaskeena kuwaas oo si adag ugu shaqeynaya inay taageeraan ardaydeena guriga. Waan fahamsanahay sida waqtigaagu qiimo u leeyahay.

Fadlan ha ka labalabeyn inaad la xiriirto shaqaalaheena dugsiga haddii aan kaa caawin karno wax uun.

Kulligeen waxaan ku wada jirnaa wadajir!

Salaama,

Christine Tucci Osorio
Superintendent